### Convention for the Prevention of Pollution from Ships (MARPOL) 1974 www.somalilandlaw.com

#### **— 747 —**

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 71, taariikh 1.11.1989: Meelmarinta oggolaanshaha ku biiridda Heshiiska Caalamiga ah ee ka hortagga wasakheynta biyaha badda ee ka yimaada maraakiibta iyo borotokoolkiisa.

### MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5 iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 oo ku saabsan wax ka beddelidadda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 35 ee 1.11.1989 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman iyo borotokiisaba;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in oggolaashaha ku biiridda Heshiiskan la meelmairyo;
WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

## Qod laad

Waxaa la meelmariyey oggolaanshaha ku biiridda JDS Heshiiska Caalamiga ah ee la xiriira ka hortagga wasakheynta biyaha badda ee ka yimaada maraakiibta oo lagu go'aan. saday magaalada LONDON sannadka markuu ahaa 1973 iyo borotokoolka la xiriira ee 1978.

## Qod 2aad

Heshiiska iyo Borotokoolka ku tilmaaman Qodobka sare waxay Dalka JDS ku yeelanayaan awood sharci ah.

# Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1,11,1989

MADAXWEYNAHA JDS (Maxamed Siyaad Barre)